



Ma aha kan xooga lihi kan dadka legda, ee kan xooga lihi waa kan naftiisa hanta markuu carodo

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade wuxuu Rasuulka Ilahay ka wariyey inuu yiri: "Ma aha kan xooga lihi kan dadka legda, ee kan xooga lihi waa kan naftiisa hanta markuu carodo.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu scw wuxuu cadeeyey in xooga dhabta ahi uusan ahayn kan jirka, ama qofka dadka xooga leh lagda, , balse kan xooga badani waa midka naftiisa ka adkaada ee qasba markuu aad u carodo, waayo taasi waxay tusaysaa inuu awood u leeyahay inuu naftiisa hanan karo oo uu ka guulaysan karo shaydaanka.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5351>

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

